

# Jabto/Gonorré

Ma rabtaa xog ku qoran afaf kale? Booqo: [www.hivportalen.se](http://www.hivportalen.se)

Jabtada waxaa sababa bakteeriya inta badan laga helo dhuunta kaadi mareenka. Bakteeriyada waxaa kale oo laga heli karaa dhuunta ama futada ragga iyo dumarkaba. Bakteeriyada waxaa kale oo laga heli karaa xuubdeecaanka xubinta taranka haweenka.

Jabtada waxay ku faaftaa galmada aan ka hortagga lahayn ee haween loo galmoodo iyo futada oo leeyasaga galmoodo. Bakteeriyada waxaa kale oo la isugu gudbiyaa galmada afka oo aan lahayn ka hortag. Haddii aaney xataa caadi ahayn, waxaa jabtada la isugu gudbin karaa isu siigaynta iyada oo xuubdeecaanka xiriir toos ah lala sameeyo. Waxaa ku filan in faruhu taabtaan xuubdeecaanka buka sidaas daraadeed uu u bukooda xuubdeecaankii caafimaadka qabay. Sidoo kale waxaad jabto ku qaadi kartaa haddaad la wadaagto qalabka galmada qof kale.

## ASTAAMAHA LAGU GARTO JABTADA

Jabtada si fudud ayaa la isku qaadiyaa umana baahna inay astaamo muujiso. Infekshanka waxaad ugu gudbin kartaa qofka aad isu galmootaan ogaan la'an darteed. Sidoo kale waxaad ka qaadi kartaa jabtada qofka aad isu galmootaan iyada oo aannu midkiinna ogayn. Haddii aad dhib iska dareento, waxaa ay qaadataa laba ilaa toddoba cisho laga bilaabo maalintii aad qaaday infekshanka iyo marka aad isku aragto astaamo. Astaamaha inta badan waa dheecaan ka yimaada dhuunta kaadi mareenka, iyo xanuun aad dareento marka aad kaadineeyso. Haddii infekshanku ku dhaco dhuunta ama futada waxaa dhici karata in ay astaamuhu yihiin kuwo sahlan ama aan la dareemin.

## ISKA BAADH JABTO

In jabtada layska baadho waa bilaash. Si loo hubiyo infekshanka waxaa laga qaadaa saami dhuunta kaadi mareenka. Dumarka waxaa kale oo saami laga qaadaa dhuunta ilmogaaleenka. Haddii aad samaysay galmo afka ama futada ah, waa in lagaa qaado saami cunaha iyo futada ah.

Is baadh haddii aad ka shaki qabto inay jabto kugu dhacday. Waxay qaadan kartaa dhowr maalmood ilaa hal toddobaad laga bilaabo markii ay kugu dhacday jabtada iyo marka uu saamigu tuso inaad qabto. Sidaas daraadeed waxaad u baahanaan kartaa inaad sugto dhowr maalmood ka dib markii aad galmada aan taxadarka lahayn sameeysay ilaa aad iska baadhayso.

## DAAWEEYN

Iska daaweeynta jabtada waa bilaash, infekshankana waxaa lagu daaweeyaa antibiotika. Waxaa muhiim ah in mudada ay daawadu kuu socoto aadan cidna u galmoon. Intaa waxaa dheer inaad saami kale iska qaaddo ka dib marka daaweeyntu kuu dhammaato si loo hubiyo in bakteeriyadii ay dhimatay ka hor inta aanad galmo bilaabin. Mararka qaar kood bakteeriyadu waa mid awood u leh inay daawada iska caabiso oo ay adag tahay in la dilo. Marka ay taasi dhacdo waxaad u baahan tahay nooc kale oo antibiotika ah. Sidoo kale waa in qofka kale eed isu galmootaana saami laga qaado. Haddii ay jiraan dhowr qof oo kala duwan ood isu galmootaan, waxaa ay dhammaantood u baahan yihiin in la baadho haddii laga helo infekshanna la daaweeyo.

## KA FIKIR WAQTIGA JABTADA

Jabtada waxaad qaadi kartaa dhowr jeer. Xataa waxaa dhici karta in aad qaaddo cudurro kale oo ay sababto jabtadu haddii aan lagaa daaweeyn. Waxaa yaraanaaya halista cudurro kale oo jabtadu sabab u tahay haddii aad si degdeg ah isu daaweeyso. Waxaa dhici karta inuu dumarka kaga dhaco hurgun (inflammation) dhuunta ugxanta. Ragga waxaa dhici karta in uu hurgun kaga dhaco xididka dheer ee shahwada ka soo qaada xiniinyaha. Jabtada haddii aan la daaweeyn waxaa dhici karta inay saameeyso awooddaada dhalmo, sababtoo ah waxaad noqon karaysaa madhaleen. Waxaa kale oo dhici karta in ay bakteeriyadu dhiigga u gudubto oo dhiiguna sumoobo.

---

Qoraalkan waxaa soo saaray heyadda sare ee maamulka bulshada (Socialstyrelsen) waxaana tifaftirey HANS CARLBERG, oo ah dhakhtarka sare ee Sösam, waaxda caafimaadka galmada ee kiliiniga cudurrada maqaarka iyo cudurrada galmada ee cusbitaalka Södersjukhuset; HANS FREDLUND, caalin iyo dhakhtar kahortagga cudurrada faafa ee heeyadda caafimaadka gobolka Örebro, cusbitaalka jaamacadda ee Örebro; LENA MARIONS, caalin iyo dhakhtar sare ee kiliniga dumarka, cusbitaalka jaamacadda Karolinska.

---

Qaabka farshaxanka iyo sawirrada: Infab

